



AUSTRALIAN INTERNATIONAL ISLAMIC COLLEGE

الكلية الإسلامية الدولية باستراليا

ABN: 85 802 283 515

26 March 2020

Bismillaahi Raxmaani Raxiim

Waalidiinta iyo daryeelayaasha xushmada leh

Xanuunka COVID-19 -fasaxa ardayda iyo shaqada Guriqa.

Waxaan raba inaan ku bilaabo mahadcelin waalidiinta sida degdeg leh ee aad uga jawaabeen codsigii ahaa inaad ilamha guriga ku haystaan.

Codsigaas waxaan u sameeyey damqashada aan u qabo ardayda ,macalimiinta iyo shaqaalaha kale arintaasina way inoo shaqaysay.

Maalinta ugu dambaysa iskuulka.

Anagoo daba socona codsigaas hore isla markaana ka jawaabayna xayiraadaha (*heerka labaad*) ee dhowaan lagu dhawaaqay.

Waxaan iskuulka u sii diyaarinaynaa waxbarshada debeda ama guriga iyadoo la isticmaalayo habka loo yaqaano Microsoft Teams.

Si arintaasi u hirgasho waxaan soo hormarinayaa maalinta ugu dambaysa iskuulka waxaana u soo durkiyey **Jimcaha 27 /3/2020**. Sidaas darteed Shanta maalmood ee ka hartay teeramka **Ardaydu waa fasax.**

macalimmintuna waxay diyaarinayaan manhajkii waxbarsho ee ardayda ,haday iskuulka wax ku baranayaan iyo haday guriga wax ku baranayaanba.

Caawinta shaqaalaha Muhiimka ah

Inagoo ogsoon muhiimada ay leedahay shaqooyinka ay qabtaan in badan oo inaga mid ahi ,sadxdaas maalmood oo ardaydu fasaxa yihiin ,waxaanu ku taageeraynaa ilaalin ardayda “dugsiga hoose keliya” waalidiinta ka shaqeeya (dhaqtarada ,farmasiyada,gargaarka degdega ah iyo wixii lamid ah ee u baahan in loo ilaaliyo ilamha .

Markaa waa inay iskuulka soo wacaan oo book garaystaan, ilamahana hubiyaan inay haystaan waxbarshadii guriga loogu talagalay.

Waxbarshada guriga

Inkasta oo aynu joogno xili adag oo aan xaalku deganayn ,hadana waxaan hubaa inaanay jirin wax ka muhiimsan badbaadada ilamheena. Ma ha in Waxbarshada guriga ama shaqada iskuuku idinku noqoto wax idin ku abuura welwel iyo culays.

Wiigii la soo dhaafay waxaan tegayey claasyada /fasalada ardyda waxaana u sheegayey waxa ugu fiican ee ay sameyn karaan intay guryaha joogaan inay kamid yihiin

- Aqrinta buugaagta (*u aqriyaan walaahood ama noole kale*)
- Caawinta jikada (*cunta karinta waa cashar fiican oo xisaab ah*)
- Geed beerista (waalidku inaad dedeba u saartaan caruurta)

Waxaa i dhiiri geliyey ,dulqaadka iyo adkaysiga aan ku arkay maalin walba ,macalimiinta ,caruurteena quruxda badan iyo waalidiintiina nagu aaminey caruurtooda qaaliga ah.

Inshalah wadajirkeena iyo dadaalkeena waa nabad gelynaa



Christine Harman

Principal